



Soo magacow Macallinka aad jeceshahay in la siiyo Abbaalmarinta Macallinka Sanadka

Magacaabistii lagu abbaalmarinayey Macallinka Sanadka ee Oregon 2019 ayaa la aqbalayaa, iyada oo dib u habeyn cusub lagu sameeyey nidaamka laguna soo kordhiyey abbaalmarin lagu sharfayo macallinka ugu sareeya gobol kasta addeegga waxbarasho ee degmadaasi bixiso.

Waaxda Waxbarashada ee Oregon waxa ay aqbalayaan magacaabista abbaalmarinta Macallinka Sanadka ee gobolka 19ka degmo addeegga waxbarashada, iyada oo la ballaarinayo tartanka ay Waaxda Waxbarashada Gobolka Oregon ay qabaneyso oo ay la kaashaneyso Bakhtiyaanasiibka Oregon. Cida ku guuleysato waxaa la magacaabi doonaa bisha Maayo, taasi oo la tixgalin doono in dhammaan gobolka oo dhan laga sharfo waxaana lagu dhawaaqi doonaa bisha Sebtembar. Macallimiinta Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay tixgalin doonaan inay sharfaan Addeegga Waxbarashada Degmada Multnomah oo ay la garabsanayaan macallimiinta degmooyinka Centennial, Corbett, David Douglas, Gresham-Barlow, Parkrose, Reynolds iyo degmada Riverdale.

Qof kasta oo raba inuu magacaabo macallin waxa lagu martiqaadayaa [in ay ku soo gubiso foom online ah](#) bisha Janaayo 31keeda. Macallimiinta la soo magacaabo waxaa la weydiin doonaa inay soo dhammeystiraan codsiga bisha Maarso 30keeda. Aqoonsiga degmadu waxaa ku jira abbaalmarin lacageed oo dhan \$500 doolar, iyo Macallinka Sanadka oo la siinayo \$5000 doolar taasi oo ay la socoto iskuulka ku guuleysta oo isaguna helayo abbaalmarin lacageed oo dhan \$5000 doolar.

Matthew Bacon-Brenes oo ah ka mid ah macallimiinta Dugsiyada Dadweynaha Portland waxna ka dhiga Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor ayaa ku guuleystay abbaalmarinta Macallinka Sanadka ee Oregon 2018, isaga oo noqday macallinkii afraad ee hela abbaalmarintaasi lagu sharfayo laga soo bilaabo sanadkii 1955.

Macallimiintii hore ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ee ku guuleystay abbaalmarintu waxa ay kala ahaayeen Elena Garcia-Velasco ee SEIS Dugsiga Sarre ee Roosevelt sanadkii 2012; Carlton Bryson Dugsiga Sarre ee Benson sanadkii 1970; iyo Lorraine Sabo ee Dugsiga Hoose ee Lewis Elementary sanadkii 1962.

-Mike Tokito